Ku dhaqan Xafiis D.


# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 5aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2017**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**


**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2017**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# SANADKA

# 2017

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 5aad Muqdisho, Lr. 5

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN SANADLE**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

## KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

# 2017

SHARCI Lr. 003 Taariikh: 08/04/2017

OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA BAARLAMAANKA GURMADKA DEGDEGGA AH EE ABAARAHA

MADAXWAYNAHA J.F.S.

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad Xarfaha "A", "B" iyo "C" ee Dastuurka KMG |
| Markuu Arkay: | Qaraarka ku saabsan ansaxinta Gurmadka Degdegga ah ee Abaaraha Tix. GSH/B-10/010/17 ee 18/03/2017 |
| Markuu Arkay: | Qodobka 10aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka KMG |
| Markuu Arkay: | Qodobka 13aad, iyo 15aad ee Dastuurka KMG |
| Markuu Arkay: | Qodobka 1aad, iyo 3aad ee Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay |
| Markuu Tixgeliyay: | Baahida loo qabo in Ummadda Soomaaliyeed meel kasto ay joogaan in laga badbaadiyo aafooyinka abaaraha, si loo helo shacab caafimaad qaba lagana badbaadiyo aafooyin sababa gaajo iyo rafaad baahsan |
| Isaga oo ogsoon: | Xaqa ay Ummadda ku leedahay Dowladdooda ee u taagan badbaadada Dhammaan Ummadda iyo Dalka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan |

Wuxuu Xeeriyay Sharcigan

## Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday ansaxinta Qaraarka Baarlamaanka ee ku saabsan Gurmadka Degdegga ah ee Abaaraha ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 2aad**

Waxaa lagula dardaarmayaa Xukuumadda Federaalka inay dardargeliso ayna sii xoojiso hawlaha wax looga qabanaayo Aafooyinka Abaaraha.

**Qodobka 3aad**

Waxaa sidaasi oo kale la farayaa Hay'adaha kale ee Dowladda iyo Ganacsatada Soomaaliyeed meel kasto ay joogaan inay ka qaataan qayb wax ku ool leh si looga samatabixiyo Ummadda Soomaaliyeed aafooyinka abaaraha, waxaa sidaasi oo kale laga codsanayaa Soomaalida dibadaha ku nool inay u soo gurmadaan Walaalahooda dhibaataysan oo ay aafeeyeen abaaraha ka jiro Dalka.

**Qodobka 4aad**

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

Ra'isul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S
Xasan Cali Khayre

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: [illegible]
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD [illegible]

## Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# GOLAHA SHACABKA

# QARAAR KU SAABSAN

# GURMADKA DEGDEG AHEE ABAARAHA

Tix: GSH/B-10/007/17

Kalfadhiga: 1-aad                                  Taariikh: 18[ka] Maarso 2017

Kulankiisa 3-aad

# GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

**Markuu fiiro gaar ah u yeeshay:** in Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Rasuuulkeena Suuban (CSWS) iyo ilaalinta maqaasiidda Sare Shareecadda iyo cadaaladda bulshada u yihiin Mabda'a aasaasiga u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka si waafaqsan Qodobkiisa 3-aad

**Markuu Arkay:** Qodobka 10-aad faqradda (1) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya oo qirayo in karaamada aadanuhu tahay deeq allahu swt ku manaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xaquuqda aadanahahuna ay deeqdaas kazoo dhalatay.

**Asaga oo xog ogaal u ah:** In Qodobada 13-aad iyo 15-aad ee Dastuurkeena uu qof kasta siinayo xaqa nolosha xoriyadda shaqsiyadded iyo nabadgaleda qofnimadiisa. Sidoo kale ugu xog ogaalsan in cahdiga Qaruumaha Midoobay ee xaquuqda Aadanahu uu qofkasta oo banii-aadam ah siinayo isla xuquuqdan kor ku xusan ee dastuurkeena saa daraadeedna xuqudaas yihiin xuquuq alla-ku-siyeen ah oo banii aadamka addunka isku dhaqan-garto iskuna tixgeliyo;

**Fiiro u yeeshay:** In nabad la'aan iyo amni la'aan aanay suurtagal ahayn in la gaaro hormar dhaqaale io horumarinta iyo taakulaynta arrimaha bulshada toona;

**Asaga oo ka welwelsan:** Xaaladaha ka dhashay jiilaalkan dheeraaday oo durba sababay dhimasho dad iyo duunyoba leh, kana murugeysan xalada sii xumaanyasa ee abaarta ku sii fidaysa dalka taas oo iyadana dhalisay barkacayaal boqolaal ku qof abaarikeenti ah oo u baahan in si deg deg ah loola gurmado kaalmo bani'aadnimo heer qaran iyo heer caalami ahba leh lala gaaro dadka abaaratu tabaaleysay si halista naftoooda iyo noloshooda ku sugan thaay looga badbaadsho.

**Fiiro gaar ah u yeeshay:** Abaabulka iyo jihaynta ay muujisay Dawladda Federaalka ayadoo kaashanayso Dawlado-Goboleedyada federaalka io qaylodhaaminta ay u dirtay shacbiga Soomaaliyeed iyo beesha caalamka ugana baaqday in wadajir loogu gurmado ka hortagga aafooyinka abaarta dalka ka jirta;

**Hadaba Golaha Shacabka Soomaaliya, Asaga oo Qoddareyey:** Baaqii saamaynta abaarata dalka haysa, oo ku jiray Hadaljeedinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Hadaljeedintii Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ka jeediyeen Golaha Shacabka Hortiisa maalintii arbacada 1-da Maarso 2017:

## WUXUU GO'AAMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

## Qodobka 1-aad:

Goluhu wuxuu u baaqaya dhamaana Hay'addaha Dowladda Federaalka iyo Hay'addaha Dawlado- Goboleedyada xubno ka ah federaalka shacbiga Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan ogaalleyda Diinta muwaadaniinta gacanasatada iyo Ururradda bulshadda in ay si wadajira ah ugu guntaddaan isuna abaabulaan sidii ay gacan uga geysan lahaayeen una kaalmeyn lahaayeen walaalahooda jiilaalka oo dheeraaday aafeeyey iyo abaartan sii baaheysana kusii habsanayso.

### Qodobka 2-aad:

Wuxuu dhamaan wasaaradaha iyo hayaddaha Dawladda fadaraalka iyo dhamaan maamullada dawlado – Goboladeedyada Dalka ku dhiirrigelinaya in ay abuuraan jawi fududeeya gaarsiinta alaabada kaalmo aadaneedka ah ee loo wado taakkuleynta dadka u baahan iyo in ay la yeeshaan wada shaqeyn dhow hay'adaha sida kaalmo-aadamiyeedka kuna korjoogteeyaan in xilgudashadooodu u fuliynayaan si waafaqsan shuruucda dalka io mabaadii'dda cahdiyada caalimiga ah ee dadweynaha aduunka wada aqoonsan yahay.

### Qodobka 3-aad

1. waxaa dawlada iyo dhamaan hay'adda dowladda federalka iyo dhamaan hay'adaha dawlado-goboleedyada dalka la farayaa in ay

canshuur dhaaf u sameeyaan alaabada loo keeno gargaarka taakulieynta aadanaha iyo ka hortagga aafooyinka abaarta.

2. Waxaa kaloo hey'adda kor ku xusan la farayaa in sharuucda xeer-nidaamyada iyo habraacyada kale ee jira la laalo hadii ay wax u dhimayaan habsami u socodka howlaha gaarsiinta taakuleynta ama shaqada haya'adda gargaarka ku howlan ama isu socodka dadka ama gaarsiinta alaabta gargaarka lagana ilaaliyo wixii arqalado ama daahid keeni karta ilaa iyo intii abaartan laga baxaayo.

## Qodobka 4-aad

In xukuumaddu Golaha shacabka soomaaliya u soo diyaarsio nidaam-siyaasadeed (policy) leh istaraatiijyad qarameed looga hor tagayo abaaraha iyo aafooyinka dabiiciga ah.

## Qodobka 5-aad

In la dhiso Guddi goloha shacabka soomaaliya oo korjoogteeya gurmadka gargaarka abaaraha iyo xukuumadda iyo guddiga Gurmadka abaaraha ay fulinayaan.

## Qodobka 6-aad

In ciidamadda Qalabka sida ee soomaaliyeed io Ciidamadda AMISOM ay si buuxda ugu qeybgalaan Gurmadka Abaaraha iyo fududeynta gaarsiinta deeqaha gurmadka ah ee loo sido shacbiga tabaaleysan.

## Qodobka 7-aad

Si loo sugo daahfurnaanta maamulka gurmadka abaaraha gudiga abaaruhu waa in uu shabakadda "website" ku soo bandhigaan dhamaan dhaqaalaha iyo agabka soo gaaray sida ku deeqday iyo halka ay ku bixiyeen si bulshda soomaaliyeed iyo deeqbixiyayaasha gudaha iyo dibededdaba loogu hubaalceliyo in deeuhu gaareen dadka loogu talagalay.

## Qodobka 8-aad

In guddiga qaranka ee gurmadka abaaraha uu ugu yaraan bishiiba hal mar warbixin ku saabsan howlaha gudiga hadba halka ay marayaan u horkeeno golaha shacabka soomaaliyeed

## Qodobka 9-aad

Dhamaan hay'adaha Qaranka heer federal iyo heer Dawlado goboleedyo waxaa la faraya in ay u hogaansamaan qaraarkan, hirgelintiisuna hubiyaan.

## Qodobka 10-aad

Qaraarkani wuxuu hirgelayaa markuu madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo oo ku meelmariyo Xeer Madaxweyne lagna sooo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

## QARAAR KU SAABSAN

## DHISIDDA GUDDIGA KORJOOOGTAYNTA

## GURMADKA ABAARAHA

Tix: GSH/B-10/008/17 Taariikh: 18^ka^ Maarso 2017

Kalfadhiga: 1-aad Kulankiisa 3-aad

## GUDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

**Markuu Arkay:** Qaraarka GSH/B-10/007/17 ee 18[ka] Maarso 2017 oo ku Saabsan Gurmadka Degedegga ah ee abaaraha;

**Markuu dhegeystay:** Talada xildhibaanada Golaha Shacabka Soomaaliya;

**Markuu Tashaday:** Goddoomiyaha ku-xigeennada Golaha Shacabka

## WUXUU GUDDOOMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

Laga bilaabo 18[ka] maarso 2017 waxaa la magacaabay Guddiga Korjoogtaynta Gurmadka Abaaraha oo ka kooban xildhibaaanada Golaha Shacabka magacyadooda halkan hoose ku xusan:

1. Xil. Amina Xassan Cali
2. Xil. Axmed Maxamed Jaamac "Ciro"
3. Xil. Axmed Xaaji Maxamed "taaw"
4. Xil. Cabdi Cali Xassan
5. Xil. Dahabo Suuban Maxamed
6. Xil. Duniyo Maxamed Cali
7. Xil. Khalid Macow Cabduqaadir
8. Xil. Maxamuud Cabdiraxmaan Beenebeene
9. Xil. Ubax Tahliil Warsame
10. Xil. Xaawa Yuusuf Axmed

### Qodobka 2-aad

Guddiga xilkiisu waa korjoogtaynta iyo kormeeridda howlaha gurmadka io gargaarka ay fulinayaa xukuumadda federaalka Guddiga Gurmadka Abaaraha iyo Hay'adaha samafalka heer Qaran iyo kuwa caalamiga ka howlgala dalka.

Qodobka 3-aad

Si waafaqsan qodobka 65-ad faqradda 5-aad ee xeer hoosaaka Golaha shacabka xilhaynta gudigan wuxuu ku eg yahay marka howlaha gurmadku dhamaadaan xilalkiisuna lagu wareejiyo guddi ka mid ah guddiyadda joogtada ee Golaha Shacabka.

Qodobka 4-aad

Qaraarkan wuxuu hirgalaya markii uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya